

Ku saabsan urur-shaqaaheedka Vision

Vision waa urur-shaqaaheed, kaasoo xoogaarkiisa oo idil ku salaysan yahay adiga iyo waxyaalaha aad ku riyonayso. Waxaan wadajir u hubsan doonaa sidii aad u gaari lahayd ama aad u heli lahayd waxa aad xirfadaada ugu han wayn tahay.

- ▶ Dad xirfadyaqaanno ah ayaa waxay ku siin doonaan talo iyo taageero ku salaysan guul iyo guuldarro ba. Horumarkeenna wuxuu ku salaysan yahay horumarka suuqa shaqada, taasoo ku suurtagelin doonto inaad naga faa'iidayso iyado fiirogaar ah aan la siin xaaladda adiga ku gaarka ah.
- ▶ Tirada xubnaha Vision way badan tahay, taasoo wanaagsan. Tirada badan waxay suurtagelisa in hab fudud saamayn lagu yeesho taasoo sii wanaajin doonto shaqadaada. Waxaad heli doontaa fursad aad xiriir kula yeelato dadyoow tiro badan kuwaasoo ku hawlan isla hawlaha oo adiga ku hawlan tahay. Kuwaasoo ku noqon doono xiriir lagamamaarmaan ah.
- ▶ Waxaad nala soo xiriiri karta saacadaha iyo siyaabaha adiga kula habboon. Waxaan ka hawlgalna dalka oo idil. Taasoo ku suurtagelin karto inaad yeelato kulan shaqsiyeed. Taasoo iyadana ku suurtagelin doonto inaad sare u qaado isku mashquulida. Habka adiga dooran karto.
- ▶ Anaga, heer degmo iyo qarheed ka sokkoow waxaan ka hawlgalnaa adduunka oo idil - Fair Union. Waxaan u hawlgalna xuquuqda aadenaha, xaqa urur yeelanshada iyo deegaanka raageha ah. Xubin ka noqoshada ururkeenna waxay ku suurtagelin doontaa inaad kaalin ka qaadato tayeeynta adduunka.
- ▶ Inkasto sidaasi ay tahay haddana xubnimada waa arrin ku saabsan hal qodob. Kaasoo ah inaad heer sare uga faa'iideysato shaqadaada.

Horyaalka Ururrada Shaqaalaha

Xubnada ururka shaqaalaha Vision waa horyaalada horumariyo oona maamulo barwaaqosoonka, kana hawlgala shirkadaha gaar ahaan loo leeyahay, dowladaha hoose, maamulada gobollada iyo kiniisadaha. Xubnaha badidooda waxaa weeyaan ardayaal kuwaasoo hamigooda ah in ay ka hawlgalaan barwaaqosoonka. Xubnahayga oo tiradooda gaarayso 168 000 waxay leeyihiin kumanyaal xirfado kala duwan, waxayna wadajir u dhisan shabakad waxtar leh. Waan ka madaxbannaan nahay xisbiyada siyaasadda waxaana xubin ka nahay ururka TCO.

Yaa xubin ka noqon karo

Qof kasta oo ku sugan goob shaqo ayaa ururka shaqaalaha Vision xubin ka noqon karo. Iyadoo fiirogaar ah aan la siin nooc shaqo ku qorida ama tirada saacadaha u qofku shaqeyo, sida shaqo rasmi ama kumeelgaar ah iwm. Xitaa ardayda xubin ayay ururka ka noqon karaan iyadoo fiirogaar ah aan la siin waxa ama mudada ay wax bartaan.

Xubnaha ururka waxay ka hawlgalaan xirfado tiradooda ka badan 4000. Qaar waa agaa-simeyaal, injeenyeero, aqoonyahannada shaqaalaha, xoghaayeyaasha arrimaha bulshada, dhaqaale-yaqaanno, wadaado, daaweyyaal, maamuleyaal, xoghaayeyaahsha caafimaadka iyo kalkaaliyeyaasha caafimaadka ilkaha. Xubnaha badidooda waxay ka soo qalin-jebiyeen jaamacad. Xubnaha ururka shaqaalaha Vision waxay qabtaan shaqooyin taageersan barwaaqosoonka, laamaha adeegga dadwaynaha iyo shirkadaha gaar ahaan loo leeyahay iwm. Xubnaha waxay kaloo ka hawlgalaan kinisadda dalka Iswiidan iyo kinisadaha madaxbannaan. Ururka shaqaalaha Vision waa ururka dalka Iswiidan ugu wayn oo xubnaha ah agaa-simeyaasha ka hawlgala dhaqdhaqaaqa adeegga dadwaynaha.

